
Kaga Qeybgalka Dhageysiga Maxkamadda ee Fiidoow

Isu Diyaarinta Dhageysiga Fiidoowga

- Daawo fiidoowga horudhaca ah ee Zoom:
 - [Sidee loogu biiri karaa kulanka Zoom ee maqal iyo muuqaal \(fiidoow\).](#)
 - Baro sida uu u shaqeeyo Zoom [adiga oo ku celceliya kulan tijaabo ah.](#)
- Tijaabi sida aad ugu xiran tahay internetka ama aad u hesho mid lacag la'aan ah (hoos ka akhri).
- [Soo dajiso barnaamijka](#) , ama gurji mareegta lagu soo diray si uu soo dego barnaamijka una gasho. **Fiiro Gaar Ah:** lagaama doonayo in aad xisaab ka furato Zoom si aad u adeegsato.

Kaga Qeybgalka Dhageysiga Si Muuqaal Ah (Fiidoow):

- Dhawr daqiiqo ka hor xilliga dhageysiga, soo gal kulanka adiga oo gujinaya mareegta ay Maxkamaddu kuu soo dirtay. Inta aan lagu ogolaan in aad gasho, waxaa lagaa doonayaa in aad magacaaga qorto. Qor magacaaga oo sadexan iyo macluumaadka kale ee Maxkamaddu ku fartay in aad qorto. Ka dib waxa aad tageysaa “qolka sugitaanka.” Ha goyn telefoonka, fadlan sug, Maxkamadda ayaa kuu ogolaaneysa in aad ka qeyb qaadato dhageysiga.
- Inta uu socdo dhageysiga, waxaa suurogal ah in “qol gaar” ah lagu geeyo si aad ula hadasho dadka kale qarsoodi. Inta qolka kugula jirta oo kaliya ayaa maqli karta waxa aad ku wada hadashaan. Maxkamadda ayaa kuu soo direysa fariin marka aad dib ugu soo noqoneysa dhageysiga ama guji “Ka Bax Qolka Gaarka Ah.”
- Marka dhageysigu biloowdo, waa la duubayaa. Wax kasta oo lagaga hadlo maxkamadda waa la duubayaa oo waxa uu qeyb ka noqonayaa diiwaanka maxkamadda sida dhageysiga dadku tago maxkamadda.

Sida Ugu Haboon Ee Looga Qeyb Qaato Dhageysiga:

- Kaameerada ku hagaaji meel la siman indhaha ama meel wax yar ka sareysa. Kombiyuutarkaaga ama telefoonkaaga korontada ku xir.

- La soco muuqaalka dhabarkaaga ah. Haddii ay suurogal tahay muuqaalka kaa dambeeya ha noqdo mid aan midab laheyn.
 - Meel iftiin wanaagsan leh fadhiiso. Sida wanaagsan, is hor dhig nal, ama daaqad isku beeg, meel iftiinku ku soo dhacayo wajigaaga.
 - Raadso meel shanqar yar oo cidina aysan kuu dhaweyn.
 - Makarafoonka ka xir marka aadan hadleyn si aan loo maqalcodka agagaarkaaga ah.
 - Bilowga hadalka hakad geli marka lagu siiyo fursad aad ku hadasho si aad uga fogaato dib u dhaca ku yimaada fiidiyoowga.
 - Haddii aadan si wanaagsan u maqli karin, Maxkamadda la socodsii adiga oo gacantaada kor u taagaya oo hadlaya marka maxkamaddu kuu soo jeedo.
-

Barta Internetka Ee Lacag La'aanta Ah:

Internetka lacag la'aanta ee Xfinity ee telefoonka lagu xirto waxaa heli kara qof kasta oo u baahan, oo ay ka mid yihiin dadka aan macaamiisha u aheyn Xfinity.

[Sida loogu xirto barta internetka Xfinity:](#)

1. Soo booqo [internetka \(wifi\).xfinity.com](http://internetka(wifi).xfinity.com) oo adeegso 'Raadi bar lagu xirto (hotspot)' oo geli nawaaxiga (zip code); ama, soo dajiso barnaamijka Xfinity Wi-Fi si aad u aragto khariidada meelaha aad ka heli karto Xfinity Wi-Fi lacag la'aan ah. Dhamaan meelaha aad ka heli karto, gudaha iyo dibadaba, waxa aad ka arkeysaa khariidada.
2. Marka aad hesho meel aad kaga xirato, macaamiisha iyo kuwa aan macaamiisha u aheyn waa in ay ka doortaan "xfinitywifi" liiska internetka ay ku xiran karaan ee ay ka arkaan telefoonkooda.

Macaamiisha Xfinity ee internetka waxa ay ku geli karaan aqoonsigooda iyo erayga sirta ah ee xisaabtooda si ay toos ugu xirtaan Xfinity Wi-Fi ee mustaqbalka. Dadka aan macaamiisha u aheyn Xfinity waxa ay ku xiran karaan iyaga oo gujiya Ogot iyo botonka ku Xiraya. Dadka aan macaamiisha u aheyn waa in ay dib u soo galaan hal mar 12kii saac ee kasta.

Fiiro Gaar Ah Waxaa suurogal ah in shirkadaha kale ee aan aheyn Comcast (Xfinity) in ay bixiyaan adeegaas oo kale.